

Ka dhig gurigaa mid caafimaad leh oo bilaa lead ah

Guryaha la dhisay kahor 1978 waxa kujiri kara ranji leh lead iyo khataro kale.

Sanad kasta, boqolaal carruur ah Degmada Hennepin ayaa laga helaa in dhiiggooda uu ku badan yahay ilaa heer dhaawacaya caafimaadkooda.

Sumowga lead 100% waa laga hortagi karaa!

Degmada Hennepin waxay wax ka qabatay khataro lead in ka badan 4,500 guri iyadoo u maraysa barnaamijka lead-ka.

Khayraadka khataro caafimaadka guriga ee kale

Deeqo iyo daymo ayaa sidoo kale la heli karaa si wax looga qabto khataraha caafimaad ee kale ee gurigaaga sida radon, qoyaanka, caaryada iyo cayayaaka.

Haddii aad tahay mulkiile-guri oo la nool ilme qaba xiiq, waxaad u qalmi kartaa qiimayn iyo maalgalin si aad u yarayso waxyaalaha xiiqda kiciya ee gurigaaga.

Nala soo xidhiidh si aad wax badan u ogaato:

612-543-4182

healthyhomes@hennepin.us



Hennepin County
Lead program

701 Fourth Avenue South
Suite 400
Minneapolis, MN 55415

healthyhomes@hennepin.us

612-543-4182


www.hennepin.us/leadcontrol

Ka ilaali qoyskaaga koraya lead




Waxaad u qalmi kartaa qiimaynta lead-ka guriga oo bilaash ah iyo deeq gaadhaysa ilaa \$10,000





Daaqadaha duugga ah waa meelaha inta badan khataraha lead-ku ka yimaadaan guriga.



La kulmida ranjiga lead-ku ku jiro waxay carruurta yaryar halis u galin kartaa:

- waxyeelo soo gaadha habdhiska maskaxda iyo dareenwadka
- gaabis ku yimaadda korriinka iyo koboca
- dhibaatooyin barasho iyo habdhaqan

Ma jiro heer lead-ku uu ammaan yahay!

Ha sugin inaad ka dhigto gurigaaga mid bilaa lead ah!

Waxaad u qalmi kartaa qiimaynta lead-ka guriga oo bilaash ah iyo ilaa \$10,000 si lagaaga caawiyo in wax laga qabto khataraha lead ee gurigaaga, sida beddelista daaqadaha duugga ah.

Shuruudaha mutaysiga:

- Gurigaaga ama guriga aad kiraysatay waxa la dhisay 1978
- Ilme ka yar lix jir ayaa ku nool ama si joogto ah u yimaadda gurigaaga ama guriga aad kiraysatay
- Qoysku wuxuu buuxiyey shuruudaha dakhliga

Hadda bilaw!

www.hennepin.us/leadcontrol
healthyhomes@hennepin.us
612-543-4182

Xog raadi kusaabsan agabka ammaanka ilmaha ee bilaashka ah



Sida la isku qoro iyo waxa la fisho:

Buuxi xogururin kooban ee kujirta www.hennepin.us/leadcontrol ama wac **612-543-4182**

Waanu kula soo xidhiidhi si aynu u muddayno booqasho guriga ah si loo go'aamiyo haddii gurigaagu uu ku habboon yahay barnaamijka deeqda.

Haddii lead la helo oo aad buuxisana shuruudaha mutaysiga, waxaanu kaala shaqayn hannaanka deeqda, xulashada qandaraaslaha iyo tallaabooyinka kale ee gurigaaga looga dhigayo mid ka madhan lead.

